

FAAFINTA

RASMIGA

الرسمية



الجريدة

**DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA**  
لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 13-aad. Garowe 26 February, 2012

Lam.2

Faafinta bil walba soo baxda

جريدة الشهرية

Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland

Qiimuhu waa Sh.So 10.000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170.000 dalka gudhiisa. dalka dibaddiisa Sh.So 500.000 rukunka la waydiisto. waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3.000. rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

**TUSMADA**

Qaybta Koowaad

Sharciga Khidmad kordhinta Hay'adda PHA

Qaybta labaad

Xeer

Waxba ma leh

Qeybta Saddexaad

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.

**Waxba ma leh**

*Sharci Lr 13. ee 27/02/2012, kuna saabsan Sharciga khidmad kordhinta Hay'adda Jidadka Puntland.*



**PUNTLAND STATE OF SOMALIA**

Sharci Lr.13 ee February 26, 2012, kuna saabsan Sharciga Khidmad kordhinta Hay'adda Jidadka Puntland.

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad faqradiisa 6-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPL/12/2012 ee 22/02/2012;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda Sharcigani u leeyahay Dawladda Puntland.

**Wuxuu soo saaray**

Xeerkan soo socda:

**Qodobka 1-aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Sharciga Khidmad kordhinta Hay'adda Jidadka Puntland.

**Qodobka 2-aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

**Qodobka 3-aad**


Dhaqangalka xeerkani wuxuu noqonayaa maalinta 16-aad laga bilaabo maalintuu faafinta rasmiga ah ee Dawladda ku soo baxay, kaas oo laga baahinayo idaacadaha, baahinta ka dib ayaa Sharcigani noqonayaa dhaqangal, cid kastana ay waajib ku tahay inuu dhawro kuna dhaqmo xeerkan.

  
Cabdisamed Cali Shire

K/S Madaxweynaha Dawladda Puntland



DAWLADDA PUNTLAND  
EE SOMALIYA



PUNTLAND STATE OF  
SOMALIA

GOLAHA WAKIILLADA

HOUSE OF REPRESENTATIVES

Xafiiska Guddoomiyaha

Office of the Speaker

Ref:- XGGW/DPL / 12 /2012

Garoowe, Arbaca

Date:- 22/02/2012

Ku:- K/S Madaxweynaha DPL

Garoowe

Ujeedo:- Ansixinta Khidmada Kordhin Hay'adda PHA.

Guddoomiyaha Golaha Wakiiladdu:-

MARKUU ARKAY;-

Dastuurka DPL Qodobkiisa 64-aad

MARKUU ARKAY;-

Soo gudbinta K/S Madaxweynaha

MWK/DPS/131/2012 ee 20/02/2012 kuna  
saabsan Soo gudbin Khidmada Kordhin  
Hay'adda PHA

MARKUU TIXGELIYEY:-

Baahida loo qabo Ansixinta Khidmada

MARKUU DHAGEYSTAY:-

Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada

WUXUU GUDDOOMIYEY:-

Ansixinta Khidmada Kordhin Hay'adda Puntland Highway Authority.

Allaa Mahad Leh

Cabdirashiid Maxamed Xirsi

Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL  
Speaker of the House of Representatives  
PUNTLAND STATE



Ku Guddoonka Golaha Wakiiladda Dawladda Puntland'

**Ujeedo: Soo gudbin khidmad kordhin hay'adda PHA.**


Mudane Guddoomiye,

Waxaa halkaan kuugu soo gudbinaynaa khidmad kordhinta loo sameeyey hay'adda Puntland Highway Authority (PHA), waxaana la soo jeediyey sidan hoos ku qoran;-

No	Magaca shayga	Khidmadda hadda	Khid la soo jeediyey
1.	Canshuurta gaadiidka	15%	18%
2.	Canshuur dayactirka gaadiidka	15%	18%
3.	Shidaalka nooc walba	30,000	45,000
4.	Olyada gawaarida nooc walba	5600	5600
5.	Gaaska la shito fuustadii	28,000	28,000
6.	Gaaska la shito jirigaan 20Lt	2000	3000

Sidaas darteed waxaan Golaha wakiiladda ka codsanaynaa inay u codeeyaan oo ansixiyaan khidmaddaas lagu horumarinayo wadooyinka Puntland.

**Mahadsanid.**

  
Cabdisamed Cali Shire  
K/s Madaxweynaha Dawladda Puntland

